## BEAR



Mashruucayaga BEAR (Bereavement, Emotions And Resilience) (Geeri, Shucuur Iyo Adkaysi) waxuu caawiyaa qoysaska uu lixdii bilood ee ugu dambeeyey ka dhintay qof ay jecel yihiin.

Tani ma aha shaqo fool-ka-fool ah oo ilme lala qabto. Dabiibe ama lataliye ayaa qoys kaste booqan doona muddo ilaa lix toddobaad ah, oo iyaga ku arki doona gurigooda ama meel u dhow. Dabiibuhu waxuu bixiyaa waxqabadyo iyo khayraad ama adeegyo ay qoysku wadajir u sameeyaan, waxayna ka taageeraan socdaalka ay wadajir ku maraan tiiraanyadooda.

## La shaqaynta Dugsiyada

Dugsiyadu waxay codsan karaan adeegyada dabiibka fool-ka-fool ah, kooxaha geerida ama tababbarka iyo khayraadka loogu talagalay shaqaalaha iyo waalidiinta, Ama CTRT (Child Teacher Relationship Therapy) (Dabiibka Xiriirka Ilmaha iyo Macallinka) Kharash ayaa soo raaca adeegyadan qaarkood.




Tusaale ahaan, waxaan annagu bixinnaa qandaraasyo dugsi oo uu dugsi ku heli karo lataliye u go'an ama dabiibe ciyaareed muddo nus maalin/hal maalin ah toddobaad kaste.

Waxaan bixin karnaa wadatashi iyo taageero loogu talagalay marka ay dhimasho lama filaan ah ama kadis ahi ku timaaddo bulshada dugsiga.

## Dabiibka Ciyaareed iyo Latalinta loogu talagalay Caruurta & Dhallinyarada

Latalin fool-ka-fool ah ama dabiib ciyaareed ayaa annagu siinnaa carruurta iyo dhallinyarada laga bilaabo 4 – 18 sano. Waxaan la shaqaynaa carruurta la kulmay geeri ama xadgudubka guriga. Waxaan badi la shaqaynaa carruurta la kulma geeri ama khasaare adag taasoo ka dhigan in laga yaabo in ilmuhu uu la kulmay mahadho ama masiibo ama khasaare hal nooc ka badan.



Iskaa ayaa adeeggan la iskugu gudbin karaa ama dugsiyada ayaa ilmaha gudbin kara. Fadlan hubi in aad rukhsad ka heshay qoyska ka hor inta aadan ilmaha gudbinin iyo in ilmuhu uu sidoo kale ka war hayo gudbinta.

Oggolaanshaha ilmaha ama qofka yar ayaan annagu marwalba u baahan nahay si aan iyaga ula shaqayno.

Si aad u bilowdo in aad gudbin noo soo dirto fadlan tag halkan https://beyondthehorizon.org.uk/ oo ka raadi boggayaga xiriirka.

# Ku soo dhawow...

Waxaan annagu caawinnaa carruurta, dhallinyarada iyo qoysaska, ku kala baahsan Birmingham, ee ay taabteen geerida, xadgudubka guriga iyo kala guurka waalidku.

Haddii adiga ama ilmahaagu aad ku wajahdeen mid ka mid ah dhibaatooyinkan waxaan idinka caawin karnaa in aad shaqo kaga gudubtaan caqabadihiina si aad u heshaan wanaagqabka shucuureed iyo rajo aad u qabtaan mustaqbalka.



# Mashruuca Penguin Project

Mashruucayaga **Penguin Project** waxuu taageeraa xiriirrada ilmaha iyo waalidka/daryeelaha marka ay la kulmeen geeri ama khasaare ama burburka qoyska. Waxaa tan lagu samayn karaa oo loo mari karaa afar kulan oo gooni ah oo lagu bixiyo Taageerada Waalidka (Parent Support), ama waxaa loo mari karaa koorsadayada Dabiibka Xiriirka Ilmaha iyo Waalidka (Child Parent Relationship Therapy) (CPRT) ee toban toddobaad ah.

## Adeegga Heart to Heart (Bog ka Bog)

Adeegga **Heart to Heart** (Bog ka Bog) waxuu bixiyaa kulanno si khaas ah loogu habeeyey waalidiinta ama daryeeleyaasha iyo carruurtooda ama dhowr iyo toban jireyaashooda.

Adeegga Heart to Heart waxuu bixiyaa waxqabadyo iyo khayraad la xiisayn karo, islafalgal leh oo darajo hooseeya si loo caawiyo in xiriirrada lagu xoojiyo koox xiran oo barbaarin leh.

Dabiibeyaashayada ama lataliyeyaashayada ayaa agabyo iyo farsamooyin caddayn loo hayo la wadaaga dhammaan xubnaha kooxda si ay iyaga uga caawiyaan in ay walbahaarka maamulaan oo ay adkaysiga bartaan.



## Dabiibka Xiriirka Ilmaha iyo Waalidka

**CPRT** waa koorso dabiib ah oo ku saabsan waalidnimada oo caddayn loo hayo. Waxay waalidiinta bartaa sida ay u isticmaalayaan qaar ka mid ah isla xirfadaha ay dabiibeyaasha ciyaareed isticmaalaan si ay u caawiyaan carruurta la kulma dhibaatooyinka bulsheed, shucuureed, ama caafimaadka maskaxda.

Waxaan koorsooyinka **CPRT** ku bixinnaa Waqooyiga Birmingham iyo Koonfurta Birmingham waqtiyo kaladuwan sanadka gudihiisa. Naga soo wac lambarka 0121 444 5454 si aad u ogaato goorta la qabanayo koorsooyinkayaga xiga.



Tel: 0121 444 5454
Iimayl: admin@beyondthehorizon.org.uk
(loogu talagalay weydiimaha aanan ku saabsanayn gudbinta)

Beyond the Horizon Charity
Moseley Exchange
149-153 Alcester Road
Moseley
Birmingham B13 8JP

## Taageerada Waalidka

Waxaan waaldiiinta ugu deeqnaa afar wadatashi dabiib ah oo fool-ka-fool ah oo ay la yeeshaan mid ka mid ah dabiibeyaashayada oo lagu qabto wicis telefoon ama fiidiyow.

Dabiibaha ayaa abuuri doona meel ama bannaan bilaa dhaleecayn ah, oo beerjileec leh si uu waalidku uga hadlo walwalladooda iyo dhibaatooyinkooda la xiriira waalidnimada.

Dabiibaha ayaa ku deeqi doona waxbarasho cilminafsiyeed oo waalidiinta/daryeeleyaasha ka caawin karta in ay fahmaan dareennada ka dambeeya habdhaqanka iyaga laftigooda iyo weliba ilmahooda/carruurtooda.



Si aad uga hadasho dirista gudbin ku saabsan mid ka mid ah adeegyadayada fadlan tag halkan www.beyondthehorizon.org.uk oo ka raadi boggayaga xiriirka.